

Soo koobida natiijooyinka sahaminta
canshuurta Lixda bilood ee cabittanka macaan
ee dukaamada, iyo helitaanka cuntada
caafimaadka leh iyo daraasadda shabakadaha
Baananka cuntada (Food bank)

Juun 2019

Public Health
Seattle & King County



Seattle Children's®
HOSPITAL • RESEARCH • FOUNDATION

Research Institute

Guudmarka warbixintan

Ujeeddada warbixintan waa in la soo koobo oo lala wadaago guud marka natiijooyinka labada daraasadood oo muhiim u ah bulshada Seattle, oo ay ku jiraan kuwii ka qaybqaatay ama taageeray cilmibaaristaan. Labada daraasadood ee muhiimka ah waa kuwa halkan ku qoran:

- ❖ Baarista dukaamada 6da bilood ee Qiimeynta Canshuurta Cabitaanada Macaan ee Seattle
- ❖ Helitaanka Cunto Caafimaad leh iyo Warbixinada Shabakada Bangiyada Cuntada-Food Bank

Sanadkii 2018, Jaamacada Washington iyo Caafimaadka Dadweynaha Seattle iyo cilmi-barayaasha King County waxay sameeyeen daraasado ujeedooyinkeedu yahay in la fahamo:

- 1) Sida ay Magaalada Seattle dukamadeedu u saameysay qiimaha Canshuurta Cabitaanada Macaan
- 2) Waxayaabaha la heli karo iyo sicirka helitaanka cunto caafimad leh xaafadaha Magaalada Seattle
- 3) Waa kuma kuwa ku nool Magaalada Seattle ee helitaanka cuntadu aaney ku filneyn
- 4) Maxey tahay bangiyada Cunta (Food Banks) ee Seattle.

Si arrimahaas loo qabto, cilmi-baarayaashu waxay booqdeen oo baaritaan ku sameeyeen ku dhawaad 200 dukaanno oo ku yaal Seattle si ay u soo aruuriyaan macluumaadka ku saabsan cabbitaannada la iibinayo iyo inta ay ku kacayaan, iyo waxa cuntada caafimaadka leh ay iibkoodu yahiin iyo inta ay ku kacayaan. Baarayaasha sidoo kale waxay sahamiyeen oo wareysteen shaqaalaha Heyadaha Bangiyada cuntada (Food Banks) iyo macaamiishooda, waxayna adeegsadeen xog rayi ururin oo horey u jirtay oo ku saabsan cidda magaalada ku sugan oo aan heli karin cunto ku filan.


Waxaan halkan ku soo bandhignay natiijooyinkaas si qoto dheer:

- [Warbixinta 6da Bilaha ah: Baaritaanka Dukaanka. Qiimaynta Canshuurta Cabitaan ee macaan ee Seattle. \(Janaayo 2019\)](#)
- [Helitaanka Cuntada Caafimaadka leh iyo warbixinta shabakada cuntada bilaashka ah bixiya \(Food Bank\). \(Febraayo 2019\)](#)

Su'aalaha had iyo jeer la isweydiyo ee ku saabsan Canshuurta Cabitaanka Macaan

Waa Maxay Canshuurta Cabitaanka Macaanku?

Laga bilaabo Janaayo 1, 2018, waxaa jirtay in la canshuuro alaabada cabitaanka sokorta leh ee lagu gado Magaalada Seattle. Canshuurta Cabitaanada Macaanku maahan canshuurta iibka si toos ah loogu dallaco macaamiisha. Taa badalkeed, cashuurtani waxay ka dhigaysaa kuwa qaybiya cabitaanka macaan in ay canshuur ka bixiyaan alaabada cabitaanka sokorta leh ee ay u kala qeybiyaan dukaanada ku yaala Magaalada Seattle. Sababtu waa in qaybiyahu si toos ah u siiya canshuurta cabitaanada Magaalada Seattle, qeybiyaha ayaa ikhtiyaar u leh in uu canshuurta ugu gudbiyo dukaamada isagoo kor u qaadaya qiimaha badeecadaha ay ka iibiyaan dukaamada. Maaddaama qiimaha ay dukaamaduhu ay ku bixiyaan cabbitaannada uu kor u kacayo, dukaamada ayaa waliba dooran kara in ay u sii gudbaan qiimahaas kordhay macaamiisha iibsanaya cabbitaannada. Xaddiga cashuurtu waa 1.75 senti halkii waqiyad oo cabbitaannada sokorta leh.



Waa noocyadee, cabbitaannada macaan ee la rabo in la canshuuro?

Shaxdan ayaa liis garaynaysa noocyada cabbitaannada ee canshuurta cabitaanka smacaan:

Cabitaannada la Canshuuro	Cabitaannada aan canshuurta laga rabin
<ul style="list-style-type: none"> • Soodada caadiga ah • Cabitaanada Tamarta iyo Sportiga • Cabbitaannada miraha leh • Biyaha la macaanaayey • Kaffega iyo Shaaha horey loo soo macaneeyey • Sharobooyinka sonkorta ku jirto Cabitaanada qaxwaha ee laga cabo dukaamada, makhaayadaha iyo raashinka degdega ah laga qaato 	<ul style="list-style-type: none"> • Cabitaannada Diet ka ah • Biyo dhalada ah • Casiir ka ah 100% • Caanaha (ay ku jiraan soy, bariis, yiciib/loows, qumbe) • Cabbitaannada loogu talagalay isticmaalka caafimaad • Caanaha formalada ilmaha • Cabitinaada Aalkolada leh

Maxay Seattle U Gudbisey Canshuurtan?

Cilmi baaris ayaa muujisay in cabitaannada sokorta leh aynan u fiicnaan caafimaadka. Cabitaannada la soo sheegay waxay horseedi karaan nooca 2aad ee sonkorowga, cudurka wadna xanuunka iyo istaroorga keena, culeyska oo kordha, iyo ilko bolol. Canshuurta cabitaannada sokorta leh waxay dadka u horsadaan in ay iibsadaan oo cabbaan cabbitaannada sonkorku ku yar tahay. Waxay sidoo kale kor u qaadaysaa dakhliga canshuurta iibka ee cabitaannada sokorta leh si ay gacan uga geysato wanaajinta helitaanka cunnooyinka caafimaadka leh iyo maalgalinta barnaamijyada iyo adeegyada qoysaska carruurta leh.

Sidee ayey Seattle u isticmaaleysaa lacagta ay ka soo aruurisay canshuurtan?

Lacagta laga soo aruurisay cashuurta waxaa lagu bixiyaa nafaqo fara badan, helitaanka cunno caafimaad leh, iyo barnaamijyada waxbarashada hore.

Qeybaha Barnaamijka	2018 Maalgashiga
Cunto Caafimad leh & Helitaanka Cabitaanka Barnaamijyada bixiya cuntada, Quudashada cuntada, ama foorjarrada si ay uga caawiyaan dadka dakhligoodu hooseeyo si ay soo iibsadaan cunto caafimaad leh; sidoo kale waxaa ku jira barnaamijyo siinaya in ay kabaan iskuulada iyo daryeelka carruurta si loo kordhiyo in caruurta istimaalan cunista miraha iyo khudaarta.	\$6.4 milyan
Adeegyada Dhalashada-Saddex Jirka Barnaamijyada horumarinaya bulshada, shucuurta, waxbarashada, caafimaadka jireed, iyo caafimaadka maskaxda ee carruurta, gaar ahaan adeegyada doonaya in ay yareeyaan farqiga natiijooyinka carruurta iyo qoysaska ku saleysan midab, jinsi, ama arrimo kale oo dhaqan-dhaqaale iyo u diyaarinta carruurta bilow wanaagsan oo cadaalad ah marka ay xadaanada bilaabayaan-Kindergarten.	\$7.5 milyan
Barnaamijyada nafaqada wanaagsan iyo dhaqdhaqaaqa jirka Barnaamijyada bulshada ku saabsan iyo nashaadaadka lagu taageerayo nafaqada wanaagsan iyo nashaadaadka jirka.	\$1.2 milyan

Su'aalaha badanaa la isweydiyo ee ku saabsan sahanka lixda bilood ah ee dukaannada

Waa Maxay Sahanka 6da-Bilood ee Dukaanku?


Sahaminta Lix-Biloodlaha ah waa qayb ka mid ah daraasadda saddax sano ah ee la rabo in lagu fahmayo inta canshuurta Seattle ay ku bixiyaa kuwa qeybiya cabbitaanka sonkorta leh ee loo gudbiyo macaamiisha iyada oo loo marayo qiimaha tafaariiqda sare (tusaale, in la fahmo inta dukaannada kor u qaadeen qiimaha canshuurta darted iyo in kale).

Daraasadu waxay bilaabatay wax yar ka hor markey cashuurta dhaqangelaysay waxaana lagu celceliyey 6 bilood kadib (Baaritaanka Dukaamada 6-Bilood). Baaritaanka ayaa lagu celceliyey mar kale 12 bilood ka dib markay cashuurtu la hirgaliyey, waxaana lagu celin doonaa markii ugu dambaysay 24 bilood kadib markay cashuurtu bilaabatay.

Sidee Loo Smeeyey Sahamada Dukaannada?

Kooxo cilmi baaris ah oo tababbaran oo ka socda Jaamacadda Washington ayaa u safray in kabadan 400 dukaanno oo ku yaal Seattle iyagoo isu barbar dhigaya kuwa ku yaala Koonfurta King County (oo ay ku jiraan Federal Way, Kent, iyo Auburn, halkaas oo aysan jirin wax canshuur ah oo ku saabsan cabbitaannada sokorta leh) si ay u ururiyaan macluumaadka ku saabsan qiimaha marka la canshuuro sharaabka iyo marka aan canshuurta laga qaadin. Kooxda waxay ka soo ururisay macluumaad qiimo leh suuqyada waaweyn, dukaamada raashinka, dukaanada xaafadaha ku yaala, dukaamada dawooyinka iibiya (Drug Stores), saldhigyada shidaalada, dukaamada qaxwooyinka, iyo maqaayadaha adeegga laga helo.

Baarayaasha waxay xisaabiyeen intaa iyo in ka sii badan oo qiimayaasha cabitaanka Seattle ay kordheen marka la barbar dhigo qiimaha cabitaanka ee Federal Way, Kent iyo Auburn. Qiimaha cabitaanka ee Federal Way, Kent, iyo Auburn waxay muujinayaan isbedelka sicirka Seattle in la arki lahaa haddii Magaaladu aysan gudbin laheyn Canshuurta Cabitaanka Macaan leh. Khariidadahaani bidixda ku yaal waxay muujinayaan dhammaan dukaamada sahaminta laga qaaday ee Seattle, khariidad midigta ahna waa Federal Way, Kent, iyo Auburn:




Cilmibaarayaashu waxey sidoo kale eegayaan haddi sicirka cabitaanka aan canshuurta lahey isbedelay, tani iyo markii qeybiyaasha iyo tafariiqleydu ay dooranayaan in ay faafiyaan qiimaha canshuurta badeecooyinka kala duwan.

Natijada daraasada ccanshurta cabitaanka macaan, ee 6da bilood lagu sameeyey sahanka dukaamada

Maxey yahiin waxyaabaha waaweyn laga helay darasadaan dukaamada 6da bilood?

Daraasadani waxay ogaatay in, 6 bilood ka dib markay cashuurta sharci noqotay, in qaybiyayaasha ay kor u qaadeen qiimaha cabitaanka ay ka iibiyeen dukaamada ku yaal Seattle, dukaamadu waxay kor u qaadeen sicirka iyagoo u gudbiyey canshuurta macaamiisha iyagoo u sii marayo qiimaha tafaariiqda sare. Celcelis ahaan, “qiimaha ku-kordhaya” cashuurta cabitaannada sokorta leh waxay tahay 1.70 senti halkii waqiyad (ounce). Maaddaama xaddiga canshuurta yahay 1.75 senti halkii waqiyad, tan waxay noqoneysaa 97% in uu sicirka gudbay. Tusaale ahaan:



Isku celis halkii waqiyadba waxaa ku kordhay 1.70			
\$1.99 Canshuurta ka hor	\$2.33 Canshuurta dabadeed	\$3.15 Canshuurta ka hor	\$5.59 Canshuurta dabadeed

Ma layaab baa in sicirka cabitaannada sokorta leh ee Seattle uu korodhay cashuurta sharaabka Macaan darteed?

Maya. Anaga oo ka jawaabaya Canshuurta Cabitaannada macaan, waxaan fileynay in dadka wax iibiya ay ku kordhiyaan qiimaha cabitaanka sokorta leh ee tafaariiq leyda. Alaabada tafaariiq leyda, ayaa dhanka kale, waxaa laga filayey in ay ku kordhiyaan macamiisha qiimaha cabitaannada sokorta leh laga qaado.

Dhammaan noocyada cabitaannada sokorta lehi miyey ku kordheen qiimaha?

Magaalada Seattle, qiimaha dhammaan cabitaanada la canshuuray si weyn ayey u kordheen, marka laga reebo qiimaha cabitaanka sokorta lagu daro ee sharoobada oo lagu gado dukaamada qaxwaha. Kororka qiimaha ayaa ku kala duwan nooc kasta oo cabitaanno sonkor leh. Tusaale ahaan, isku celceliska qiimaha kororka waxuu u dhexeysa 62% cabitaannada kafee ee sonkorta leh ilaa 111% cabitaannada tamarta leh (energy drinks). Celceliska heerka kororka soodada wuxuu yahay 102%.

Qiimaha kordhay ee cabitaannada sokorta leh miyey ku kala duwan yihiin nooca dukaamadu?

Haa, sicirka kororka cabitaannada sokorta leh waa ay ku kala duwan yihiin noocyada dukaamadu. Dukaamada ugu waaween (tusaale ahaan, suuqyada waaweyn iyo dukaamada sare), celceliska qiimaha kororku waxuu yahay 86%. Dukaamada yar yar, sida dukaamada raashinka, dukaannada dawooyinka, iyo dukaannada yaryar, celceliska qiimaha kordhay wuxuu ka badan yahay 100%.

Nooca Dukaanka	Celcelis ahaan gudbinta cabitaannada cashuurta laga qaado
Suuqyada waaweyn iyo superstores (tusaale ahaan, Safeway, QFC, Target)	86% (1.50 senti halkii waqiyad)
Dukaamada raashinka (Red Apple, Vietnam-Wah)	104% (1.82 senti halkii waqiyad)
Dukaamada daawada (Walgreens, CVS, Rite Aid)	104% (1.82 senti halkii waqiyad)
Dukaamada yaryar (7-Eleven, saldhigyada gaaska, bakhaarada ku habboon)	103% (1.80 senti halkii waqiyad)

Kawaran Cabitaannada aan Sonkorta Lahayn ee aan Cashuurta laga qaadin – kuwaasi miyeey sidoo kale canshuurt ku koradhay?

Qiimaha cabitaannada aan sonkor lahayn ayaa si aad ah kor ugu kacay, laakiin waxey ku kalia tahay noocyada dukaamada qaarkood. Tusaale ahaan, qiimaha cabitaanada aan canshuurta lagu darin kuma kordhin suuqyada waaweyn iyo kuwa sare. Si kastaba ha noqotee, qiimaha cabitaannada aan canshuurta laga qaadin waxay si aad ah ugu kordheen dukaamada supermarket ka, dukaamada dawooyinka (Drug Stores), iyo dukaamada yaryar. Dukaamadaan waxey ku kordhiyeen qiimaha soodada, cabbitaannada tamarta loo cabo, shaaha dhalada ku jira, iyo cabbitaannada isboortiga ayaa kordhay. Qiimaha biyaha dhalada ku jira ayaan kor u kicin oo, inta badan noocyada dukaannada, iyo sidoo kale qiimaha caanaha kor uma kicin.

Nooca Dukaanka	Qiimaha wuxuu kordhiyaa cabitaannada aan canshuurta jirin
Suuqyada waaweyn iyo superstores (tusaale ahaan, Safeway, QFC, Target)	Midkoodna
Dukaamada raashinka (Red Apple, Vietnam-Wah)	0.47 senti halkii waqiyad
Dukaamada daawada (Walgreens, CVS, Rite Aid)	0.47 senti halkii waqiyad
Dukaamada yaryar (7-Eleven, saldhigyada gaaska, bakhaarada ku habboon)	0.77 senti halkii waqiyad

Sidee bay milkiilayaasha dukaamada yaryar u sharaxeen waaya-aragnimadooda cashuurta 6 bilood kadib?

Marka lagu daro sahaminta, helitaanka dukaamada ee alaabada iyo qiimayaashooda, cilmi baarayaashu, waxay waraysiyo kooban la yeesheen 31 milkiileyaal dukaamo, si ay u weydiyaan waxa khibradooda ay ka heleen cashuurtii cabitaanka macaan ilaa hadda, iyo sida ay u go'aansadeen in ay u dejiyaan qiimahooda cusub canshuurta hadda la dhaqan galiyey.

Inta badan milkiilayaasha dukaamadu waxay sheegeen in ay qiimaha alaabada dukaamadooda kordheen tan iyo intii cashuurtii la bilaabay; laba milkiileyaal ah ayaa noo sheegay in qiimahoodu uu sidiisii ahaa. Midkoodna milkiilayaasha dukaamadu ma soo sheegin hoos udhaca qiimaha cabitaankooda. Hoos waxaa ku yaal jawaabaha milkiilayaasha ay su'aalahan ka bixiyeen:

Maxey tahay khibradaada Canshuurta Cabitaanka Sokorta leh?

Badankoodba mulkiilayaasha dukaamadu waxay dareemeen in iibku hoos u dhacay sababtuna tahay kororka qiimaha cabitaanka. Dukaamo dhowr ah ayaa soo sheegay in macaamiishooda ay yihiin dad dakhligoodu hooseeyo, sidaa darteedna, macaamiishoodu aysan ku iibsan doonin cabbitaanno sonkor leh qiime sare. Dukaamada qaar ayaa soo sheegay in ay u jaban tahay macaamiishooda in ay iibsadaan cabbitaanno sonkor leh oo ka baxsan xadka magaalada Seattle maaddaama xudduudda magaalada aysan ka fageyn dukaanka ama ay ka jaban tahay macaamiishooda in ay ka iibsadaan bakhaarada waaweyn sida Costco. Laba milkiile oo iibiya ayaa soo sheegay in macaamiishooda ay hadda iibsadaan biyo badan maaddaama qiimaha biyuhu ka jaban yihiin isla markaana macaamiisha ay ogyihiin in cabbitaannada sokorta leh aysan u wanaagsaneyn caafimaadkooda.

- 10% (3/31) Saddex ka mid ah sodon iyo kowga dukaan, waxey sheegay khibrad isku dhafan oo ku saabsan canshuurta
 - *“Wax u wanaagsan maha ganacsiga lakiin dadka, way u fiicantahay maxaa yeelay caafimaad uma fiicnaha in la cabo cabitaanno sonkor leh.”–Waxaa laga soo xigtay dukaamada yar yar ee isku xiran*

- *“Waxaan u fahmay, sababta loo soo rogay canshuurtan in ay la xiriirto caafimaadka dadka, laakiin dadku ma joojin doonaan cabitaanka sonkorta leh. Waxay la mid tahay sigaarka. Dadku way yimaadaan oo wax ka yar intii hore ay cabijireen bay iibsadaan. Xilliga xagaaga, dadku wax badan ayey iibsadaan maxaa yeelay xilliga xagaaga waa kuleyl dadkuna waa ay haradan yahiin.”-Waxaa laga soo xigtay dukaan yare e Somaliyeed*
- 23% (7/31) Todoba ka mid sodon iyo kowga dukaan waxay soo sheegeen khibradood in aaney dan ka lahayn cashuurta cabitaanka macaan
 - *“Macaamiish si isku mid ah ayey u yimaadan mana danaynayaan isbedelka sicirka.”-Waxaa laga soo xigtay dukaan yar ee Somaaliyeed*
 - *“Dadku way cabanayaa laakiin iibku isma beddelo. Dadku way sii iibsadaan cabitaannada.”- Waxaa laga soo xigtay dukaamada yar yar ee isku xiran*
- 68% (21/31) Kow iyo labaatan ka mid ah sodon iyo kowga dukaan waxay soo sheegeen waayo-aragnimaadu canshuur cabitaanka macaan aney wanagsaneyn
 - *“Macaamiisha way ka cawdaan canshuurta walina way iibsadaan ama macaamiisha way fiiriyay qiimaha oo way baxaan. Xadka Seattle waxaa u dhow magaalooyin kale dadku waxay aadayaan meel ka baxsan Xadka Magaalada Seattle si ay cabitaanka uga soo iibsadaan. Waxaa laga soo xigtay dukaamada yar yare ee aan isku xirneyn*
 - *“Iibku aad ayuu hoos ugu dhacay. Waxaan dhihi lahaa iibku hoos ayuu u dhacay 25-35%. Dukaamada xuduuda Seattle dhaca ayey si ba'an u canshuurtu u saameeysey*

Xagee ka iibsataa alaabadaada?

Markii la weydiiyay milkiileyaasha meesha ay ka iibsadaan badeecadahooda cabitaan, dhammaan milkiilayaasha bakhaaradu waxay ku warbixiyeen in ay ka soo iibsadaan Safeway, Costco, WinCo, Cash n Carry, iyo / ama Resaturent Depot. Qaar ka mid ah milkiilayaasha dukaamada ayaa wax ka soo iibsada dukaamada waaweyn ee ku yaal Seattle iyo qaar ka baxsan Seattle halkaas oo cabitaanadu raqiisan ka yihiin. Intaa waxaa sii dheer, qaar ka mid dukaanleyda ayaa ka soo iibsada cabitaannada kuwa qeybiya Coke da. Ugu dambeyntii, si loo go'aamiyo qiimaha iibka cabitaannada, milkiileyaal badan ayaa qiimeeya sicirka cabitaannada iyadoo lagu saleynayo qiimaha cabitaannada ka socda bakhaarka weyn ee sanduuqda laga iibsado. Milkiilayaasha dukaamadu waxay ku darsadaan xaddiga faa'idada sicirka wax iibsiga. Dukaan kastaa wuxuu adeegsadaa qiimo asaga u gaar ah, waxeyna guud ahaan ku daraan 20-50 senti dheeraad ah qiimaha iibka cabitaanka oo ah qiimaha lagu iibiyo dukaamada Soomaaliyeed.

- 45% (14/31) Afar iyo toban ka mid ah sodon iyo kowga dukaan waxey sheegeen in ay wax ka iibsadaan oo kaliyah bakhaarada waaweyn sida Restarent Depot, Costco, Cash n Carry. Dhammaan 14-ka dukaann waxaa iska leh Soomaalida

- 42% (13/31) Saddex iyo toban ka mid sodon iyo kowga dukaan waxay sheegeen in ay ka iibsadeen oo keliya kuwa qeybiya cabitaanka sida Pepsi, Coke, McLane, iyo Columbia
- 13% (4/31) Afar ka mid ah sodon iyo kowga dukaan waxey soo sheegeen in ay cabitaanka ka iibsadeen kuw qeybiya iyo bakhaarada waaweyn. 2 ka mid ah dukaamada ayaa ahaa dukaamada yaryar ee Soomaalida.

Sideed baad u go'aamisaa qiimaha badeecadaada?

14-ka dukaan ayaa soo sheega in ay ka iibsadaan bakhaarada waaweyn, 100% dukaamada waxey sheegen in qiimeynta ku saleyaan iyagoo ku daraya faa'iidada qiimaha ay iibiyaan.

- 17 ka dukaan waxey sheegeen in ay ka soo iibsadaa kuwa cabitaanka qeybiya-distributes:
- 65% dukaamada ayaa sheegaya in ay deqsadaan qiimahooda u gaarka ah, ha ahaadaan dukaamada shaqsiga loo leeyahay ama xafiisyada sharikadaha la wadaaga ayaa dajiya scirka iibka.
- 29% dukaamada waxay sheegaan in qiimaha ay dejiyeen kuwa cabitaanka qeybiya-distributers
- Hal dukaan ayaa sheegaya in dejinta qiimaha lagu saleyo saameynta ay ku leeyihiin kuwa cabittanka qeybiyaha iyo sidoo kale xafiiska shirkadaha la wadawadaago

Helitaanka Cuntada Caafimaadka leh iyo natiijooyinka daraasadda shabakadda Bangiyada Cuntada

Helitaanyadan cunooyinka caafimaadka leh iyo natiijooyinka shabakadda bagiyada cuntada ayaa ah ilo loogu talagalay dadka iyo hay'adaha daneynaya dhisitaanka helitaanka sinnaanta cuntada caafimaadka leh ee Seattle. Natiijooyinkan waxey soo bandhigayaan sawir buuxa oo ku saabsan sida ay u egtaahy helitaanka cuntada caafimaadka leh ee Seattle.

Waxaan u qaabeynay qiimeyntaan juhdiga ay galiyeen oo ah talo soo-jeedin ka timid Guddiga La-talinta Canshuuraha cabitaanka macaan, iyo Kooxda Dib-u-eegista Canshuuraha Magaalada Seattle, iyo khabarada cilmi-baarista.

Qiimayntun waxey ka kooban tahay shan qaybood oo muhiim ah:

1. Maxaan ka ognahay helitaanka cuntada caafimaadka leh?

Cilmi baaris ayaa muujisay in si fudud loo hagaajiyo helitaanka cunto caafimaad leh aaney ku filneyn in tilaabo horumar leh horey loo qaadin cunto tayo leh iyo natiijo wacan ee caafimaadka, ama in la isu soo dhaweeyo farqiga cunitaanka caafimaadka leh ee ka dhexeeya qoysaska dakhligoodu sarreeyo iyo kuwa uu hooseeya. Fahamkeenna helitaanka cuntada caafimaadka leh waxay ka timid fikradda asalka ah ee loo yaqaan "food desert" oo macanheedu yahay cunto aan caafimaad laheyn (oo ay weheliso in diirada la saaro sida gaarka ah ee masaafada jireed ee u dhexeysa guryaha dadka deganyahiin iyo suuqyada waaweyn) si loo eego cabbirro kala duwan oo ay ka mid yihiin helitaanka, habboonaanta, awoodi, aqbalitaan, iyo degaan.


Seattle iyo meelo kaleba, cilmi baaris ku saabsan helitaanka cuntada ayaa laga sameeyey cabbirro fudud oo ku saleysan dhawansha dukaanka si loo tixgeliyo illaa xaddiga cuntooyinka caafimaadka leh ee la xiriiira awooda helitaanka dukamada la awoodo in wax laga iibsado, gaadiidka (ku habboonaanta), nooca dukaanka raashinka (helitaan habboonnaan, iyo soodhaweyn), iyo arrimo badan oo shakhsiyadeed iyo arrimo bulshadeed.

2. Qiimaynta Deegaannada Cuntada ee Deriska.

Waxaan ogaanay in aagagga mudnaanta cuntada caafimaad leh (meelaha ay ku yar yihiin helitaanka cuntada caafimaadka leh) waxaa ay ku yaalliin xadka koonfurta Seattle ee agaaarka marin-biyoodka Duwamish (oo ay ku jiraan Georgetown, South Park, Delridge, iyo High Point). Waxaan sidoo kale aragnay meelo badan oo ku yaal Seattle oo ay ku jiraan xaafadaha dhamaadka waqooyiga- North End. Halkaas, in kasta oo derisyadoodu badankood ay yihiin kuwo dhaqaale ahaan aamin ah, degganeyaasha (residents) dakhligoodu hooseeyo - gaar ahaan kuwa ku tiirsan gaadiidka dadweynaha - ayaa laga yaabo inay la kulmaan caqabadaha helitaanka cuntooyinka caafimaadka leh. In kasta oo Delridge iyo aagagga waqooyiga iyo koonfurta Seattle lagu tiriyo in ay yihiin kuwa cuntadu ku yartahay sida ay sheegtay.

Waaxda Beeraha ee Mareykanka, falanqayn dheeri ah ayaa waxey muujineysa waxyaabaha soo socda:

- Aagagga ay ku badan yihiin saboolnimada waxaa ay ku yaaliin xadka waqooyiga magaalada, meelo ka mid ah aagagga ku wareegsan Greenwood iyo Sand Point, Degmada Jaamacadda, iyo sidoo kale Degmada Bartamaha-Central District-, Koonfurta illaa Koonfur-bari iyo Galbeedka Seattle.
- Dadka waqti dheer u soo safra in ay adaan dukaamada tafaariiqleyaasha si ay u soo iibsadaan cunto caafimaad leh ayaa ku noolaa aagagga biyaha leh, Eastlake, dariiqa agagaarka Marin Biyoodka Duwamish (oo ay ku jiraan Georgetown, South Park, Delridge, iyo High Point), iyo Degmada Jaamacadda-University District.
- Waqtiyada safarka dheer waxay u egtahay in ay saameyn ku yeelan doonaan qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee ku nool meelahaas in ka badan qoysaska dhaqaalahoodu sareeyo.
- Hal safar socdaal ah ku saabsan in soo kala xusho cuntooyinka caafimaadka lehu waxay qaadataa wax ka badan afar daqiiqo dadka ku nool meelaha ay ku sugan yihiin suuqyada tafaariiqda cuntada iibiya oo ay xulashada caafimaadka ku yar tahay marka loo eego meelaha ay ku kala duwan yihiin xulashooyinka cuntada (11 daqiiqo vs. 7 daqiiqo).
- Meelaha mudnaanta leh ee cuntada caafimaadka leh ee ku dhow xadka koonfureed iyo biyo-ximareeka Duwamish (oo ay ku jiraan Georgetown, South Park, Delridge, iyo High Point) isu geyn waxay ka siman yihiin dhammaan saddexdan arrimood: daqliga oo hooseeya, waqtiyada safarka oo dheer si loo gaaro dukaamada tafaariiqda cuntada caafimaadka leh iibiya, iyo xadiga cuntada aan caafimaadka laheyn oo sareysa. Waxaan sidoo kale ogaanay aagag yar yar oo ku yaal Seattle oo ay ku jiraan xaafadaha dhamaadka waqooyiga North end, in kasta oo derisyadooda badankood ay yihiin kuwo dhaqaale ahaan aamin ah, degganeyaasha dakhligoodu hooseeyo - gaar ahaan kuwa ku tiirsan gaadiidka dadweynaha waxey wajahii karaan caqabado xagga helitaanka cuntada caafimaadka leh.
- Khariidaddan ayaa muujineysa aagagga mudnaanta u leh caafimaadka. Oranji waa aagagga ugu baahi badan, waxaa ku xiga jaalle, ka dibna buluug ah.



HSPA INDEX	
	Xaalad ebe
	Meelah faqrigu yaalo
	Faqri+xaalad
	Faqri+2 xaaladood kale
	Paarks
	Washado
	Biyo
	Dhul


3. Waa maxay qiimaha iyo helitaanka cuntada caafimaadka leh ee dukaamada Seattle?

Waxaan ogaanay in bakhaarada waaweyn (bakhaarada, suuqyada waaweyn, dukaamada raashinka) ay lahaan jireen helitaan badan oo cunto caafimaad leh, marka la barbar dhigo dukaannada yar yar (dukaamada dawooyinka, dukaamada yar yar). Celcelis ahaan, bakhaarada waaweyn ayaa laga helayaa inta ugu sareeya, waxaana ku xigay suuqyada waaweyn iyo dukaamada raashinka. Dukaamada dawooyinka iyo dukaannada yar yar waxay leeyihiin raashin caafimaad ahaan aad u yar marka la barbar dhigo noocyada dukaannada waaweyn. In kasta ayan haynin miro, khudaar, ama hilib, bakhaarrada dawooyinka drug stores, lakiin waxey ka sareeyaan dukaamada yar yar; tani waxay u badan tahay xaqiiqada ah in dukaamada dawooyinka ay si joogto ah u hayaan ukunta, digirta, caanaha, iyo badarka. Ka helitaanka dukaamada yar yar cunta waxey u dhaexeyaan; 75% dukaamada yar yar waxay gadaan caano, 69% waxay gadaan qamadi ama haruur, 56% waxay gadaan miro cusub, 50% waxay hayaan ama gadaan borotiinno, 25% waxay hayaan khudaar cuseyb. Hal dukaan oo yar kaliya ayaa haya hilib cusub gada.

Markaanu eegnay qiimaha iyo kala duwanaanshaha dukaamada xaafadaha, waxaan ogaanay in xaafadaha dakhligoodu hooseeyo iyo xaafado ay ku nool yihiin dad badan oo Madow ama Hisbaanish ah ay ku yar yihiin suuqyada waaweyn iyo kuwa sare, iyo dukaanno kale oo aadka u yar. Waxaa hooseeya helitaanka cunnooyinka caafimaad leh ee xaafadaha dadka dakhligoodu hooseeyo iyo xaafadaha ay ku nool yihiin dad badan oo Madow ama Hisbaanik ah.



12.80 dhibcood	10.98 dhibcood	8.58 dhibcood
Aagaga ugu dakhliga badan	Aagaga dakhliga dhexe	Aagaga ugu dakhliga yar
Dukaamada ku yaala xafaadaha dhakhligoodu sareeyo waxey heystaan isku celicelin 4 ama ka badan cunnooyinka caafimaadka leh, Tusaale 50% wax ka badan cunto caafimaad leh		



<p>9.29 dhibcood Ugu sareysa % ugu badan waa madow ama Husbaanik</p>	<p>11.05 dhibcood Meel Dhexaad % dhexdhexaadka waa madow ama Hisbaanik</p>	<p>11.90 dhibcood Ugu hoseeysa % ugu hooseeya waa madow ama Hisbaanik</p>
<p>Dukaamada xafaadaha ay dagan yahiin tiro yar ee madow iyo hisbanishku waxey heystaan 3 ama ka badan cunooyinka cafimaadka leh, Tusaale 30% wax ka badan cunto cafimaad leh</p>		

Sicir ahaan, qiimaha cuntooyinka caafimaadka leh waxay u muuqdeen in ay ka hooseeyeen xaafadaha dadka dakhligoodu hooseeyo iyo xaafadaha ay ku nool yihiin dad badan oo Madow ama Hisbaanik ah. Helitaanka cuntada, borotiinka, caanaha, badarka, iyo khudaarta ayaa u muuqdaan kuwo ka qaamo jaban xaafadaha dakhligoodu hooseeyo iyo xaafadaha ay ku nool yihiin dad badan oo Madow ama Hisbaanish ah marka la barbar dhigo sicirka cunnooyinka xaafoadaha dakhligoodu sareeyo oo ay ku yar yahiin dadka Madowga ah ama Hisbaanishka ah. Si kastaba ha ahaatee, kalsoonida lagu qabo qiyaasta tirokoobka inta u dhaxeysa waa isugeyn la is-dhaafsaday, taasoo muujineysa in kala duwanaashaha qiimaha ay u badan tahay in aysan si rasmi ah u muuqan.

4. Waa Kumaa kuwa ay la soo gudboonaato cunno yaraanta ka jirta Seattle, oo ay sameysay 'farqiga haqab-beelka cuntada'?

Magaalada Seattle, qiyaastii 13% dadka waaweyn waxay la kulmaan xaalad amni darro (oo aaney haysan lacag cunto ugu filan). Qoysaska Seattle ee carruurta leh ayaa soo maray heerar sare oo xagga nabadgelyo-xumada cuntada ah, min 22% qoysaska leh caruur yar yar (Heerarka Ugu Fiican Sahminta Caruurta) ilaa 51% qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee leh carruurta (Sahanka Seattle ee dukameysiga iyo faayaqabka Caafimaadka).

In kasta sicirka heerarka cuno la'aanta ay ku kala duwan yihiin ilaha xogta, lakiin qaabka farqiga waa isku mid ilaha xogaha. Cunno xumadu waxey ku sarreysa kuwa dakhligoodu iyo waxbarashadoodu hooseeyso. Guud ahaan, dadka midabka leh waxay la kulmaan amni xumo heer keedu sarreeya marka loo eego dadka cadaanka ah; iyo guryaha aan AF ingiriiska looga

hadlin ayeey u badan tahay marka Ila barbardhigo qoysaska ingiriiska ku hadla waayo aragnimada ay u leeyahiin cunto xumida. (Marka laga reebo qoysaska ku hadla afka Shiinaha). In kasta oo wax farqi ah lab iyo dhediga aan laga helin dadka waaweyn ama carruurta da'da dugsiyada, heerarka sugnaanta cunno yarida ayaa laba jeer ka sarreeya shakhsiyaadka loo aqoonsaday in ay yahiin khaniisin, ama ku isku jinsiga ee isu taga iyo kuwa isdhalan rogay, (LGB) marka loo eego kuwa lagu tilmaamay in ay isu galmoodaan iyago lab iyo dhedig ah. Cunto xumada ayaa kor u kacday carruurta dhigata fasallada 8aad, 10aad, iyo 12aad; waxeyna ka sareysay da'yarta marka loo barbar dhigo dadka waaweyn oo dad'doodu tahay 40-jir iyo wixii ka sii weyn.

Waxaan sidoo kale ogaanay in ka qaybgalka barnaamijka cuntada ee SNAP / Cuntada Aasaasiga ah, iyo iyada la durayo cuno yaraanta sii socota, ay ku sii fideyso hal koox oo ah dadka weyn ee gudaha magaalada Seattle. Ilaa iyo 300% ee Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) waxaan aragnaa in cunno yardi ay bilaabayso in ay hoos ugu sii dhacdo dadka waaweyn ee Seattle; dadka midabka leh, waa 400% FPL. Waxaan ku qiyaasnay in 13,420 deganeyaasha Seattle ee 2017 ay galeen "farqiga haqab-beelka cuntada," oo lagu qeexay in ay yihiin degganeyaasha aan u qalmin dheefaha kaalmada cunnada, laakiin aan haysan lacag ku filan oo ay ku iibsadaan cuntada ay u baahan yihiin. Qiyaastaasi way ka badnaan laheyd haddii ay kujirto dadka, in kasta oo ay qaadanayaan kaalmooyin, haddana ay la soo deristay cunno yaraan.

5. La Kulanka Baahida. Maxaan ka ognahay shabakadda bangiyada cuntada (Food Bank) ee Seattle?

Jawaab bixiyaasha bangiyada cuntada ee Seattle (n = 25) ayaa sheegay in ay qaybiyaan 22,885,225 rodol oo cunno ah sanad walba. Bangiyada cuntada ayaa ku tilmaamay kororka baahida cuntada, iyagoo sheegay in ay soo booqdeen dad badan oo ka mid yimid waayeello da'waaweyn, Dadka aan hoyga heysan, iyo weliba dadka ku nool waqooyiga iyo koonfurta. Waxey 60% jawaab bixiyaasha bangiga cuntada sheegeen in ay kordheen booqashadii sanadkii la soo dhaafay, 39% waxey sheegeen in maalgalinta sidii hore oo kale aheyd ama la dhimay. Si loo sii wado baahida, 65% jawaabeyaasha bangiga cuntada waxey sheegeen in ay yareeyaan noocyada raashinka halka 41% ay yareeyaan qadarka ama tirada cuntada la siiyo macmiil kasta. Aqlabiyad (68%) bangiyada cuntada waxey sheegay in ay haysteen wax ka yar 10% miisaaniyadooda iibka cuntada tooska ah. Macaamiisha bangiyada cuntada ayaa muujiyay rabitaanka helitaan joogto ah oo cunto tayo leh sida qudaarta cusub iyo borotiinno, waxayna carrabka ku adkeeyeen muhiimadda ay leedahay in sumcadda bangiga cuntada kor loo qaado iyada oo la abuurayo waayo-aragnimo u dhiganta dukaanda raashinka gada oo kale. Saacadaha qeybinta cunta ayaa kuwa xaddidan dhammaadka usbuuca-weekend iyo fiidadka, taas oo muujin karta farqi dheeraad ah oo u dhexeeya helitaanka. Si wax ku ool ah loogu adeego macaamiisha, shaqaaluhu waxay adkeeyeen wax ka qabashada baahiyaha howlgalada sida shaqaale ku filan iyo meel wanaagsan, awood wax iibsasho oo badan, iyo maalgashiga nidaamyada mobilada la isguxiro si ay u taakuleysa soo iibsiga iyo qeybintaba.

WARBIXINTA OO DHAMEYSTIRAN (Ingiriisiga)

Warbixinta 6 Bilaha: Baritaanada Dukaamada Dukaanka. Qiimaynta Canshuurta Cabitaan Macaan ee Seattle. (Janaayo 2019):

<https://www.seattle.gov/Documents/Departments/CityAuditor/auditreports/6%20Month%20St ore%20Audit%20Report%20.pdf>

Helitaanka Cuntada Caafimaadka leh & Warbixinta iyo iskuxirka Bangiyada Cuntada (Food Bank). (Febraayo 2019):

[https://www.kingcounty.gov/depts/health/~media/depts/health/data/documents/healthy-food-availability-report.ashx](https://www.kingcounty.gov/depts/health/~/media/depts/health/data/documents/healthy-food-availability-report.ashx)

KUWA LAGA SOO XIGTAY QORALAKA

Bolt K, Carter L, Casey D, Chan NL, Chen R, Jones-Smith JC, Knox M, Oddo VM, Podrabsky M, Saelens BE, Schachter A, Ta M, Pinero Walkinshaw L, Yang A. Helitaanka Cuntada Caafimaadka & Cunnada Warbixinta Bangiga Shabakada. Warbixinta Magaalada Seattle iyo Golaha Magaalada Seattle. Feb 2019.

KALA XIRIIR WAXII MACLUUMAAD AH

Nadine L. Chan, PhD, MPH

Nadine.chan@kingcounty.gov

206-263-8784

MAHADCELIN

Warbixintan waxaa loo hibeeyay dadka ay la soo deristay cunno yarida, gaar ahaan kuwa badan ee ka qeyb galayaasha shabakada bangiyada cuntada ee waqti galiyey in ay nala wadaagaan aragtidooda kala duwan. Kooxda Qiimeynta waxay si gaar ah ugu mahadcelinayaan caawimaadda weyn ee aay ka heleen bulshada iyo khabiiirada mowduuca hoos ku taxan.

Qiimaynta shabakada bangiyada cuntada waxay ku xirantahay ka qeybgalka guud ee bangiyada cuntada ee Seattle, Guddiga Cuntada Seattle, oo kala ah Frank Miranda, Sabrina Jones, Christina Wong (SBT La-talinta Bulshada), Joe Gruber, iyo Jennifer Muzia sida ay u soo gudbiyeen akhbaarta oo ay horumariyeen xog aruurinta, sahanada tijaabada ah, qabashada xogwaresysi kooxda xallinta; Ardayda dhigata derajada 2aad ee Jaamacadda Washington oo kale ah Kayla Cody iyo Edsel Blanche. Waxaa dibada u baxay oo qeyb ka ahaa cilmi baaristan, wacyi gelinta iyo xog ururinta; Isuduwaha kooxda xallinta: Sharissa Tojok (Isuduwaha luuqada Kantones ka), Kim Tran (isu duwaha Vietnames ka), Lenny Orlov (isu duwaha Ruushka), iyo Gabriel Perez (Isuduwaha Isbaanishka); iyo Adeegyada DataGain oo qabatay tarjumaadda iyo duubista maqalka.

Waxaan u mahadcelineynaa dukaamo badan ee cuntada oo qeyb ka ah daraasaddan iyo caawimaadda uu ka helay xiriiriyaha bulshada ee ganacsatada Soomaaliyeed ee ku saabsan hanti-dhowrka tafaariiqda, iyo markii aan u tarjumay warbixintan Somaaliga, waxaan jeclaan laheyn inaan u mahadcelinno Mudane Cabdullaahi Jaamac. Waxaa gacan ka geystay soo uruurinta xogta iyo dhaqdhaqaaqa sahaminta ardayda dhigata waxbarashad darajada 2aad ee Jaamacadda Washington Sam Vinci, Jessica Wolf, iyo Kelsey Kinderknecht, iyo sidoo kale xog uruurintooda badan; Waxaan uga mahadnaqaynaa Anita Rocha falanqayna iyo khibradeeda.

Waxaan jeclaan lahayn in aan u mahadcelinno shaqaalaha Magaalada Seattle oo si dhow ula shaqeeyey Kooxda Qiimeynta si ay u horumariyaan qaabeynta daraasadda ama u fidiyaan taageero xogan, kuwaas oo kala ah Natalie Thomson, Leslie Stewart, Liz Fikejs, Carol Cartmell, Bridget Igoe, Sharon Lerman, Priya Saxena, Katie Clemens, Fahima Mohamed, Brian Rosete, Pamela Calderon Maskara. Jaamacadda Washington qeybta Urban Farm Dr. Anne Vernez Moudon iyo Dr. Phil Hurvitz way bixiyeen liis ay ku qoran yihiin ganacsiyada cuntada ee loo aqoonsaday in ay ku yaalliin King County.

Waaxda Caafimaadka Dadweynaha –Seattle iyo King County, waxey jeclaan lahayn in aan u mahadcelinno Alastair Matheson, Sara Jaye Sanford, Mariko Toyoji, iyo Lin Song taageeradooda falanqeynta, Gloria Albetta oo tafatirtay, iyo Joie McCracken (Hsu) maaraynta soo saarida warbixintan.

WAXAA MAALGALIYEY

Warbixintan waxaa maalgeliyey Magaalda Seattle Xeerka 125324 ee Canshuurta Cabitaanka Sokorta leh.